# Baadhitaanka wax maqalka

Landstinget Kronoberg waxa uu kuu soo bandhigayaa baadhitaanka wax maqalka ee carruurta dhalatey. Ujeedadu waxa weeye in xili hore la helo dhaqo cuslaanta, si wax loogu  qabto iyo si ay uga caawiso in barashada luqada ay u fududaato.

**Sidee ayuu u dhacayaa baadhitaanku?**
Habku waa mid hore in badan loogu soo isticmaalay oo loo yaqaan OAE - OtoAkustiska Emissioner. Aalad yar oo wadata gudbiye iyo mikirifoon ayaa la galiyaa kanaalka dhegta. Jabaq sameecad ka soo baxaysa ayaa la dirayaa iyadoo markaa unugyada wax maqalka ee dhagtu ay ka jawaab celinayaan ayaa waxa sameysmaaya cod daciif ah oo uu mikfoonku soo qabanaayo. Jawaab OEA ah ayaa markaa la qorayaa taas oo sheegaysa in markaa la qiyaasaayo inuu wax maqalku caadi yahay. Baadhitaanku waa mid degdeg ah, xanuun iyo khatar toona aan laheyn.

**Halkee iyo goorma?**
Dhamaan carruurta hadda ku dhalatey Kronoberg ayaa loo sameynayaa baadhitaankaa, caadi ahaan intaanay guriga tagin ama marka ay dib ugu soo laabtaan si markaa baadhitaanka PKU-da loogu sameeyo.

**Maxaa dhacaaya ka dib?**
Xataa haddii ilmaha yar ee dhashay uu maqalkiisu wanaagsan yahay ayaa dhibaatooyin wax maqalka ahi hadhow iman karaan, khaasatan dheecaan dhagta

**Haddii natiijadu aanay noqon waxaynu rabney?**
Carruurta tiro yar ayaanay noqon natiijadu wixii la rabey, laakiin intooda badan ayaa wali leh maqal caadi ah. Awooda tignoolajiyada ee qiyaasta ayaa saameyn karta natiijada, tusaale ahaan haddii ilmahu ay dhagaha kaga hadhsan yihiin xab ama dux uu ku soo dhashay. Haddii ay natiijadu noqon weydo mid aan la rabin ayaa tijaabda dib loo sameyn doonaa.

1-2 ayaa 1000 carruur ah ee hadda dhalatey laga helaa dhaawac dhagaha oo ay ku soo dhasheen.
Carruurta ayaa lagula soconayaa ciyaadada wax maqalka ee Centrallasarettet Växjö.

Miyaad qabtaa su'aalo?  La soo xidhiidh dhakhtarka magalka carruurta ee ciyaadada dhagaha sanka iyo cunaha



dhex ku dhasha. Sidaas darteed waa muhiim in laga digtoonaado wax maqalka ilmaha iyo barashada hadalka.
**Baadhitaanka - POX**

1-da okoobar ayay qeybta dhalmada ee Centrallasarettet Växjö soo rogtey baadhitaan dheeraad ah, taas oo loo yaqaan baadhitaanka POX.  Taas micnaheedu waxa weeye inaanu baadhno ilmaha hawo qaadashadiisa iyo wareegiisa dhiiga dhagta midig iyo lugaha mid ka mida iyadoo la isticmaalaayo mashiin gaar ah. Baadhitaanku waa mid degdeg ah oo aan xanuun u laheyn ilmaha. Waxaanu jeclaan laheyn inaanu sameyno baadhitaankan marka uu ilmahu yahay 6 ilaa 24 saacadood laakiin waa la sameyn karaa ka hor iyo ka diba. Waa in la sameeyo ka hor intaan laga bixin qeybta dhalmada.

Sababta aanu u soo rogney habkan cusub ee baadhitaanka joogtada waa inaananu baadhitanka caadiga ah ku helin carruurta qabta wadne xanuunka xun. Baadhitaankan waxa uu naga caawin doonaa anaga si aanu u helno carruur badan oo qabta cudurad wadnaha ee khatarta ka hor inta aanay calaamado helin.

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtaan wixii ku lug leh baadhitaanka carruurta ayaad ku soo dhawaan kartaan inaad la soo xidhiidhaan umulisad ama dhakhtarka carruurta.

tel 0470-58 73 54 isniin-jimce saacada 11-12

## PKU-tijaabada

Tijaabada PKU-da ayaa carruur kasta oo ku dhalata Swiidhan loo sameynaayey marka laga soo bilaabo 60-kii. Ujeedada waxa weeye in la helo carruurta leh mid ka mid ah dhawr cudur oo khatar ah oo lagu soo dhasho kuwaas oo la daawyn karro iyo in helitaan hore ay muhiim u tahay baadhitaanka.

Haddii mid ka mid ah qiyaastu aanay caadi aheyn ayaa dhakhtarka carruurta uu ku soo wacayaa si ilmaha uu ugu yeedho baadhitaan. Khatarta ay ilmahiina ugu dhacayso mid ka mid ah cuduradan aad ayay u yartahey. 100 000 carruur ah ee ku dhasha Swiidhan ayaa qiyaas ahaan 75-85 ay leeyihiin mid ka mid ah cuduradan ka mid ay tijaabada.

Bilowgii waxa kaliya la tijaabinaayey cudurka fenylketonuri (PKU) laakiin tirada cudurada ayaa la kordhiyey dhowr jeer maadaama oo ay aqoonta baadhitaanku ka sii fiicnatey. Liistada xiligan xaadirka ah ee cudurada tijaabada ka midka ah waxay ku jiraan cinwaanka "PKU-laboratoriet" hoostiisa ee xarunta Centrum för Medfödda Metabola Sjukdomars bogga www.karolinska.se/CMMS. Halkan ayaad xataa ka heli kartaan macluumaad dheeraad ah oo ku sabsan tijaabada-PKU.

Tijaabada waa in la qaado sida ugu dhahsaha badan kadib marku uu ilmahu 48 saacadood jir yahay. Dhowr dhibcood oo dhiiga ah ayaa la soo qaadayaa warqad filterka, hawadaa lagu qalajinayaa kadibna waxa loo dirayaa PKU-laboratoriet si ay u baadhaan. Natiijada baadhitaanka waxa la helayaa hal todobaad ka dib. Marmarka qaarkood ayaaney ku filneyn tijaabadu in baadhitaan lagu sameeyo markaas ayaanu ku weydiisan karnaa dhiig cusub. Intaa ka dib ayaa la keydinayaa tijaabda si loogu sameeyo baadhitaanda kale ee dheeraadka, loo hubiyo tayada baadhitaanka iyo habka la isticmaalay. Natiijada waxa kaloo oo loo ogolaan karaa cilim baadhista kale ee aan lagu tagri faleyn. Baadhitaanka waxa maareynaaya oo keydinayaa sida waafaqsan sharciga bangiga keyda bayoolajiga.

Dhagaha- sanka- cunaha- iyo ciyaadada maqaarka
Ciyaadada carruurta iyo dhalinta
Region Kronoberg

PKU-laboratoriet
Karolinska Universitetssjukhuset

La soo saaray 2016

# Baadhitaanka wax maqalka, Baadhitaanka - POX iyo tijaabada PKU ee carruurta hadda dhalatey

